

Xiiq-dheerta

Waa maxay xiiqdheertu?

Whooping Cough, oo sidoo kale loo yaqaan xiiq-dheerta, waxaa sababa bakteeriya ku faafta hawada. Calaadaha hore ee xiiq-dheertu waxay u bilaaban karaan sida hargabka caadiga ah. Ka dib waxay isu rogi kartaa qufac, matag, ama neefsashada oo ku adkaata.



Maxaa ka dhacaya Degmada King County?

Kiisaska xiiq-dheerta ayaa halkan ku soo badanaya gudaha degmada King iyo guud ahaan Maraykanka. Qaar badan oo ka mid ah dadka bukooda waa carruur, oo ay ku jiraan dhallaanku. Qaar ayaa isbitaal la dhigay.



Maxaan samayn karaa?

Tallaalka ayaa ah habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo xiiq-dheerta. Waxay si gaar ah muhiim ugu tahay dhallaanka iyo dadka uurka leh, maadaama dhallaanku aad u xanuunsan karaan. Tallaalka xiiq-dheertu waxay badbaado u yihiin carruurta iyo dadka waaweyn, oo ay ku jiraan dadka uurka leh.

Tallaalladu, sida dawo kasta, waxay yeelan karaan waxyeelooyin. Dhibaatooyinka uu leeyahay ee ugu caansan waa kuwo fudud oo iskood u taga. Fiiri shaxda hoose si aad u aragto tallaalka kugu habboon.



Dhallaanka iyo carruurta yaryar

DTaP

2, 4, iyo 6 bilood
15-18 bilood
4-6 sano



Toban-Jirrada/Sindheerta

Tdap

11-12 sano



Dadka uurka leh

Tdap

Saddexda bilood ee u horaysa uur kasta



Dadka waaweyn 19+

Tdap

Mar walba kuwa weligood aan qaadan talaalka



Ma u baahan tahay dhakhtar? La xiriir Barnaamijka Helitaanka Caafimaadka Bulshada adiga oo wacaya 1-800-756-5437 ama u dir email CHAP@kingcounty.gov.



Wax badan ka baro xiiq-dheerta qufac: bit.ly/kcpertussis